

### **Waa maxay ujeeddada laga leeyahay Ra'yi baarista waalidka ee iskoolka?**

Ra'yi baarista waalidku waxay waalidka siinaysaa fursad ay ku dhiibtaan sida ay u arkaan waxbarashada, ka-helidda iskoolka iyo wadashaqaynta iskoolka iyo guriga. Natiijada baarista waxaa isticmaali doona iskoolka, mulkiilaha iskoolka iyo maammulka waxbarashada ee dawladda, iyaga oo u isticmaali doona falanqaynta iyo horumarinta bey'adda iskoolka- iyo waxbarashada.

Natiijada ka soo baxda baaritaanka waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa cilmibaaris, waxaana cilmibaarayaasha la siin karaa macluumaadkii baaritaanka oo aan waxba laga beddelin (rãdata). Waxaa dhici karta in qaybo ka mid ah natiijada Ra'yi baarista waalidka in lagu daabaco ayada oo tirakoob ah [www.udir.no](http://www.udir.no).

### **Sidee ayuu baaritaanku u dhacayaa?**

Iskoolladu gu'ga iyo dayrtaba way qaban karaan Ra'yi baarista waalidka. Xor ayaa loo yahay in baaritaanka laga jawaabo iyo in kale. Waxaa kale oo aad samayn kartaa in aad baaritaanka billowdo, kaddib na aad ka booddo su'aalaha aadan doonayn in aad ka jawaabto.

### **Mas'uuliyadda maaraynta iyo ilaalinta macluumaadka qofka**

Agaasinka waxbarashada iyo mulkiilaha iskoolka ayaa mas'uul ka ah in macluumaadka oo dhan loo xafido si waafaqsan Xeerka ilaalinta macluumaadka qofka wayna wadaagaan mas'uuliyadda maaraynta. Shaqaalahayaga kombiyuutarrada ayaa xagga sancada baaritaanka u qaabilsan Agaasinka waxbarashada iyo mulkiilaha iskoolka, waana in ay raacaan isla xeerarkaas ka yaalla macluumaadka qofka.

Xeerar aad u adag ayaa ka yaalla in natiijada baaritaanka la tuso iskoollada, mulkiilayaasha iskoollada iyo mas'uuliyiinta waxbarashada ee dawladda. Haddii uu iskoolku galo bogga internetka ee natiijoyinka iskoolku ma arki karo qofka ay jawaabtu ka timid, meelaha ay jawaabaha laga bixiyay yar yihiinna laysmaba tuso. Waxaa sidaan loo yeelay si loo yareeyo fursadda si aan toos ahayn loogu garan karo waaliddiinta jawaabay. Macluumaadka baaritaanka weligood loo daabici maayo hab laga garan karo qofka gaarka ah iyo wixii uu ku jawaabay. Macluumaadka waxaa la haynayaa ilaa iyo inta lagamamaarmaan loogu arko gaarista ujeeddadi baaritaanka.

Marka aad jawaabayso ma dhiibaysid magac, lambar dhalasho ama macluumaad kale oo keenaya in toos ah lagu garto. Sidaas darteed na aad iyo aad ayay u adag tahay in la garto qofka iyo waxa uu baaritaanka ku jawaabay. Marar aad u yar, tusaale ahaan meelaha yaryar, ayay jiri kartaa fursad uu qofka haya macluumaadka baaritaanka oo aan waxba laga beddelin uu ku garan karo qofka iyo waxa uu ku jawaabay (aqoonsi aan toos ahayn). Agaasinka waxbarashada iyo mulkiilaha iskoolku way codsan karaan in la siiyo macluumaadka oo aan waxba laga beddelin.

Haddii uu Agaasinka waxbarashadu cilmibaarayaasha siiyo macluumaadkii oo aan waxba laga beddelin, markaas waa in ay raacaan xeerarka ka yaalla maaraynta macluumaadka iyo waajibka xog qarinta, waana in ay saxiixaan caddayn xog qarinta.

## **Gundhigga qaanuunka ee maaraynta macluumaadka qofka**

Waxaad oggolaanaysaa in aad baaritaanka ka qaybqaadato iyo in natiijada loo isticmaali karo cilmi baaris. Gundhigga qaanuunka ee maaraynta macluumaadka qofka ee Ra'yi baarista waalidku waa xeerka ilaalinta macluumaadka qofka (GDPR) qodobka 6 Imbr. 1 xarafka a iyo qodobka 9 Imbr. 2 xarafka a, oo ku saabsan oggolaashada maaraynta macluumaadka qofka. Marka uu baaritaanku dhammaado ayuu shaqaalahayaga kombiyuutarradu kala goynayaa furihii isku xirayay magacaaga iyo jawaabtaadaa. Sidaas darteed na suurtaggal ma ahaan doonto in oggolaashadaada lagala noqdo baaritaan la qabtay.

## **Su'aal ma qabtaa?**

Haddii aad warbixin intaan ka badan u baahan tahay waxaad la xiriiri kartaa iskoolka ama Agaasinka waxbarashada.

Agaasinta waxbarashada waxaa lagala xiriiri karaa:

**Taleefan:** +47 23 30 12 00

**limayl:** [post@udir.no](mailto:post@udir.no)

**Internett:** [www.udir.no](http://www.udir.no)

Waxaad sidoo kale warbixin badan ka helaysaa [www.udir.no/undersokelser](http://www.udir.no/undersokelser). Su'aalaha la xiriira ilaalinta macluumaadka qofka waxaa lagu aaddin karaa ilaaliyaha macluumaadka qofka ee Agaasinka waxbarashada, oo loogu dirayo: [personvernombud@udir.no](mailto:personvernombud@udir.no) ama ilaaliyaha macluumaadka qofka ee mulkiilaha iskoolka.

Kormeerka macluumaadka (Datatilsynet) ayaa loo gudbiyaa cabashooyinka maaraynta macluumaadka qofka ee Ra'yi baarista waalidka ee iskoolka. Eeg: <https://www.datatilsynet.no/om-datatilsynet/kontakt-oss/hvordankan-jeg-klage-til-datatilsynet/>